



## Vantaa Culture Kids

Ilmo kasta oo deggan Vantaa oo la dhalay 2023 iyo wixii dambeeyay waxaa lagu martiqaadi doonaa inay Kids Culture Vantaa ugu soo biiraan haddiyad dhalasho ahaan. Barnaamijku waa bilaash.

Vantaa Culture Kids waxay sannad walba ka qayb qaadan karaan laba munaasabad oo lacag-la'aan ah iyadoo uu wehlinayo qof weyn ilaa ilmuhiugsiga ka bilaabay.

Ilaa si kale loo shaaciyo mooyee, munaasabadaha ayaa ku habboon qoysaska oo dhan, iyadoo la eegayn aqoonta luqadeed iyo asalka dhaqameed. Waad dooran kartaa munaasabadaha kugu habboon.

Munaasabadaha waxaa loo qorsheeyay qaab ku habboon ilmaha si looga dhigo ka qayb qaadashada mid fudud oo suurtogal ah. Shaqaalaha jooga munaasabadaha Vantaa Culture Kids ayaa ku caawin doona kuna taageeri doona, marka looma baahna in laga welwelo ka qayb qaadashada.

Munaasabadaha waxaa soo qabanaabiyyay in ka badan labaatan hawl-wadeennada ku jira fanka iyo dhaqanka ee ku sugaran Vantaa oo dhan.

Fayo-qab dhaqameed oo la idin kugu talagalay adiga iyo ilmahaaga!

Munaasabadaha Vantaa Culture Kids ayaa la qorsheeyay si loo taageero horumarka carruurta iyo marxaladaha korritaanka. Xiaa dhallaanka yaryar qaabab kala duwan ayay deegaankooda u indhindheeyaan. Samaynta iyo fahamka fanka waxay si togan u saamaysaa nolosha carruurta iyo dadka waaweynba. Waqtiga ay si wadajir ah u qaataan dadka waaweyn iyo ilmaha wuxuu kor u qaadaa fayo-qabka qoyska oo dhan iyo la qabsashada nolosha maalinlaha ah.

Ka diiwaangeli ilmahaaga Vantaa Culture Kids

Haddii ilmahaagu ku nool yahay Vantaa oo la dhalay 2023 ama wixii ka dambeeyay, waxaad ka diiwaangelin kartaa barta Vantaa Culture Kids [vantaa.fi/culturekids](http://vantaa.fi/culturekids).

Gooso tikidhada munaasabadaha bilaashka ah

Waad daalacan kartaa waadna goosan kartaa tikidhada munaasabadaha Vantaa Cultural Kids addoo u maraya barta jadwal taariikheedka Vantaa Event Calendar tapahtumat.vantaa.fi/kulttuurilapset.

Macluumaad dheeraad ah: [vantaa.fi/culturekids](http://vantaa.fi/culturekids)

Fadlan noola soo xiriir iimayl ahaan: culturekids@vantaa.fi

Adeegyada dhaqanka ee magaalada Vantaa (City of Vantaa's Cultural Services) ayaa maamula barnaamijka Vantaa Culture Kids.

[vantaa.fi/culturekids](http://vantaa.fi/culturekids)

culturekids@vantaa.fi